

**Xeerka 23 Agoosto 1957, lamba. 29 rep.**

**Oggolaashaha Amaahda Soomaaliyeed ee lagu bixinayo amaahda dhismaha shaqaalaha dawladda ee loogu dhisayo guryaha madaniga ee la dago.**

### **WASIIRKA**

Markii uu arkay Dekereetda 18 Maajo 1956, lamba. 78 “Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya”;

Markii uu arkay Amarka 22 Febberaayo 1954, lamba. 3 “Dhismaha Xaqa Guud“ Amaahda Soomaaliyeed”;

Marka uu arkay dekereetada lr. 28 rep ee taariikhda 29 Agoosto 1957 taasoo lagu oggolaaday abuuridda Qaybta Madaxbannaan ee laga dhisay “Amaahda Soomaaliyeed”;

Marka uu garowsaday in haboontahay “Amaahda Soomaaliyeed” ee la soo sheegay in in la siiyo amaahda dhismaha shaqaalaha dawladda si loogu dhiso guryo madaniya ee la dego;

Marka uu dhagaysatay Golaha Wasiirada;

Talo soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Guud, uuna ku waafaqaya Wasiirka arrimaha Dhaqaalaha;

### **WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA:**

#### **Qod. 1**

Qaybta Madaxa Bannaan ee amaahda dhismaha ee Amaahda Soomaaliyeed waxaa loo oggolaaday in ay bixiso amaah dhismaha shaqaalaha dawladda shuruudaha dekereetadunu ay dhigayso.

#### **Qod. 2**

Shaqaalaha Dawladda ee doonaya in la siiyo amaahda dhismaha si ay u dhistaan guryo, waa in ay u soo qortaan Wasaaradda Arrimaha Guud kaasoo codi uu ka muuqdo goobta wax laga dhisayo. Codsiga waa in uu la socdaa mashruuca naqshadda laga sameeyay, muuqaalka iyo qiimaha kharashka.

#### **Qod. 3**

Tirada amaahda la bixinayo waa in aany ka badanaan sikastaba Sh. So. 30.000. Lacag bixinta waxay ku dhacaysaa hannanka haftada inta hawluhu ay socdaan. Iyadoo lagu salaynayo kolba horumarka saxda ah ayna eegayaan xubnaha farsamayaqanada Qaybta amaahda dhismaha.

#### **Qod. 4**

Amaahda sida ay Xukuumaddu Soomaalia kor ku bixisay waxay xilqaadaysaa 50% dulsarka fulaya amaahda iyada.

#### **Qod. 5**

Codsiga lagu soo gudbiyay si waafaqsan qod. 2 ee dekereetadaan, waxaana eegaya Guddi gaara oo ka dhisan Wasaaradda Arrimaha Guud oo ka kooban Wasiirka oo guddoominaya iyo min hal wakiil oo ka socda dhammaan Wasaaradaha ay Xukuumadda ka koobantahay. Guddigu waxay ku dhawaaqayaan aqbalaadda codsiga waxayna go'aaminayaan sida ay isugu xigaan bixinta amaahda. Go'aanka Guddiga waa mid aan laga doodi Karin.

### **Qod. 6**

Amaahda lagu soo sheegay Dekereetadaan lama siin karo shaqaalaha dawladda ee leh guryo kale oo baahidooda qoyskooda u qalma. Waxaa reeban in la siiyo amaahda dhismaha wax ka badan hal guri, isla qofka iyo xitaa xubnaha qoyskiisa ee isaga la nool.

Milkiilayaasha waa in si shaqsi ah ay u degaan guryaha ama ay dejiyaan qaraabooda muddo aan ka yareyn shan sano oo ka soo bilaabata taariikhda dhammaystirka dhismaha. Kireynta iyo wareejinta hoyga shanta sano u horreysa ama dhowrid la'aanta mamnuucidda ku xusan labada faqraddood ee hore waxay keenaysaa in la baabi'iyo heshiiska amaahda iyo dhicitaanka waxtarka dhimista dulsarka.

### **Qod. 7**

Dhammaan wixii aan ku xusnayn Dekeretadaan, ee ku saabsan bixinta amaahda dhismaha shaqaalaha dawladda waxaa lagu dhaqayaa xeerarka nidaaminaya Qaybta Madaxa Bannaan ee u degsan amaahda dhismaha ee Amaahda Soomaaliyeed iyo kuwa gaarka u ah ee ku jira heshiisyada wixii la xariira iyo faah-faahinada ku lifaaqan.

Muqdisho, 29 Agoosto 1957.

Wasiirka

**Maxamuud Cabdi Nuur**

Waa la hubiyay lana diiwaangaliyay – Diw. lamba. 4, bogga lamba.164.

Muqdisho 29 Agoosto 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**